IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

**EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

Sannadka 16aad Muqdisho 1da Disembar 1988 L. 12

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

QAYBTA KOWAAD

**XEER**

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 56 ee 3 Okt. 1988, Magacaabid Guddoomiyayaal M.B.D.- Bog; 793

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 57 ee 10.7.88, Magacaabid Guddoomiyaha Golaha Sh. Degaanka Hobyo.- » 795

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 58 ee 19.6.88, Magacaabid Guddoomiye Maamul Gobol.- » 796

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 59 ee 8.9.88, Ka Saarid Golaha Degaanka.- » 797

Wakaaladda Madbacadda Qarankà

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 60 ee 28.8.88, Magacaabid Guddoomiye Maamul.- » 798

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 61 ee 3 Okt. 88, Magacaabid Nootaayo.- » 799

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. SOOL 3.10.88, Lumid Jeeg War. L. 0708159 ku qoran Cabdikariin Aw Xasan L. 506 » 800

MAXKAMADDA G. BANAADIR 31.10.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Sugiwc Cali Fiidow L.507 » 801

MAXKAMADDA G. BANAADIR 15.11.88, Lumid Jeeg War. L. 1291615 ku qoran C/llaahi Jaamac Cilmi L. 508 » 802

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.11.88, Lumid Buug Kayd L. 29879 ku qoran Cabdi Khaliif Maxamed L. 509 » 803

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.11.88, Lumid Jeeg War. L. 0764940 ku qoran Caydaruus Guure Faarax L. 510 » 804

MAXKAMADDA G. BANAADIR 19.9.88, Lumid Buug Kayd L. 26927 ku qoran Fowsiya Maxamed Xasan L. 511 » 805

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.11.88, Lumid 18 Jeeg War. ku qoran Faarax Maxamed Warsame L. 512 » 806

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.11.88, Lumid Jeeg War. L. 594161 ku qoran Xaamud Aw Alaale L. 513 » 807

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.11.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Daahir Cusmaan Cosoble L. 514 » 808

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 21.11.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Casay Waydow Xayow L. 515 » 809

MAXKAMADDA G. BANAADIR 21.11.88 Lumid Jeeg War. Lr. 0117200 ku qoran Xasan Khaalid Maxamuud L. 516 » 810

MAXKAMADDA G. BANAADIR 22.11.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Nuur Cusmaan Aadan L. 517 » 811

MAXKAMADDA G. BANAADIR 24.11.88 Lumid Jeegagga War. L. 0254526—0254565 ku qoran Xaaji Cusmaan Xasan Gaabow L.518 » 812

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.11.88 Lumid Jeegagga War. L. 1338734—1338737 ku qoran Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow L. 519 » 813

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.11.88 Lumid Jeegagga War. L. 1338739—1338741 ku qoran Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow L. 520 » 814

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.8.88 Lumid Buug Kayd L. 11632 ku qoran Maxamed Sheegow Maxamed L. 521 » 815

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.11.88 Lumid Buug Kayd Lr. 7008 ku qoran Maxamed Xuseen Maxamed L. 522 » 816

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 56 ee 3 Okt. 1988, Magacaabid Guddoomiyeyaal M.B.D.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S;

MARKUU ARKAY: Sharci Lam. 3, ee 10kii Jannaayo 1970, iyo wixii beddelaad ka dambaysay;

MARKUU TIXGELIYEY: Talo-soo-jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka;

MARKUU GARAWSADAY: Dib-u-habaynta qaabka dhismaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobollada qaarkood;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:-

Qod. 1aad

1) G/Sare Ileeye Ciye Xoosh, waxaa lagu magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobolka J/Dhexe (Bu'aale), isagoo sii hayn doona xilkuu hore u hayey oo ahaa Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Gobolka J/Hoose;

2) G/Dhexe Maxamed Xasan Axmed «Due Rige» waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Gobolka Hiiraan isagoo sii wadan doona xilkii hore ee Guddoomiyenimada Maxkamadda Badbaadada Gobolka Sh/Dhexe;

3) G/le Suleymaan Jaamac Ciise waxaa lagu magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobollada Sanaag iyo Sool isagoo isla markaasna sii hayn doona xilkii Guddoomiyenimada Maxkamadda Badbaadada ee Gobolka Togdheer oo uu hore u hayey;

4) G/le Cabdi Gacal Caddoow waxaa lagu magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobollada Bay, Bakool iyo Gedo;

5) G/le Cabdikariin Qalinle Kaahin, waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobolka Awdal, isagoo sii hayn doona xilku Guddoomiyenimo ee Maxkamadda Badbaadada Gobolka W/Galbeed (Hargaysa) oo uu hore u ahaa;

Xeerkan wuxuu dhaqangelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda;

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 1
Muqdisho 5 Oct. 1988
Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali
Muqdisho, 3 Ott. 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 57 ee 10.7.88, Magacaabid Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Deegaanka Degmada Hobyo Jaalle Maxamed Jimcaale Abtidoon.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Golayaasha Shacbiga Deegaanka ee lamb. 6 ee 12.2.1980;

MARKUU TIXGELIYEY: Talo soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

MARKUU AQOONSADAY: Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Deegaanka ee Degmada Hobyo.

WUXUU XEERIYEY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

In Jaalle MAXAMED JIMCAALE ABTIDOON oo hore u ahaan jiray Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Deegaanka Degmada Hobyo mar labaad loo magacaabo inuu noqdo lana wareego xilka Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Deegaanka ee Degmada Hobyo, kaddib markii laga cafiyey dembigii lagu soo eedeeyey.

Qod. 2aad

Jaallahani waxa uu xaq u leeyahay in la siiyo gunnada xil iyo wixii kale ee soo raaca oo lagu qaato jagada loo magacaabay, sharciguna u oggol yahay.

Qod. 3aad

Mushaharkiisa iyo gunnadiisaba waxaa laga bixin doonaa Miisaaniyadda Dawladda Hoose ee Degmada Hobyo.

Qod. 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 36
Muqdisho, 27 Luul. 1988
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 10.7.1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 58 ee 19.6.88, Magacaabid Guddoomiye Maamul Gobol.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82/14 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Shacbiga Degaanka, Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in Guddoomiye Maamul Gobol loo magacaabo Gobolka Bari;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERIYEY.

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

In Gobolka Bari loo magacaabay in Jaalle Cumar Jaamac Maxamed (CUMAR DHEEMAN) inuu noqdo Guddoomiyaha Maamulka Dowladda Gobolka Bari.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lr. 44
Muqdisho, 7 Nov. 1988
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 19 Luul. 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 59 ee 8.9.88, Ka Saarid Golaha Degaanka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82/14 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Qod. 41/1 ee Sharci lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Shacbiga Deegaanada, Maam. Gobollada iyo Deg mooyinka;

ISAGOO ARKAY: Qod. 5aad ee Sharci Lr. 43 ee 1.12.79

Sharciga Doorashada Golayaasha Shacbiga iyo Deegaanada;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhi_ say Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Warqad lr. XMD/DB/SAFAR/04/88 ee 19.8.88, kana soo baxay Guddoomiyaha Maam. Dowl. Deg mada Baardheere;

ISAGOO DHAGEYSTAY: Talada Wasiirka Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERIYEY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Maxamed Faarax Afdheere oo ka mid ah Xubnaha Guddiga Joogtada ee Golaha Shacbiga Degaanka Deg. B/_ dheere waxaa laga qaaday Xilka Guddiga Joogtada, waxaa-na lagu caddeeyey inuu ka dhacay Xubinimada Golaha Shac biga Deegaanka, kaddib markii lagu eedeeyey inuu ka soo horjeedo Xukunka maanta jira.

Qod. 2aad

Waxaa la oggolaaday in Jagada ka bannaanaatay Xu_ binimada Golaha Shacbiga Deegaanka Deg. B/dheere uu buuxiyo Musharaxa ugu horreeya Liiska Keydka Golaha Shacbiga Deegaanka.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lr. 45
Muqdisho, 7 Nov. 1988
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali
Muqdisho, 8.9.1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, lr. 30 ee 28.8.1988, Magacaabid Guddoomiye Maamul.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82/14 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Shacbiga Degaanada, Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr; 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in Guddoomiye Maamul Gobol loo magacaabo Gobolka Gedo;

ISAGOO OGHAGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERIYEY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Qod. 3aad

In Guddoomiyihii Maamulka Dowladda Gobolka Sh/Dhexe G/Sare Cali Maxamed Aadan loo magacaabay inuu noqdo Guddoomiyaha Maamulka Dowladda Gobolka Gedo.

Qod. 2aad

In Guddoomiyihii Maamulka Dowladda Gobolka Gedo G/Sare Maxamed Cabdi Aadan dib loogu celiyey Ciidanka Guulwadayaasha ee uu hore uga tirsanaa.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lr. 1 bogga lr. 42
Muqdisho, 7 Nov. 1988
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali
Muqdisho, 28.8.1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 61 ee 3 Okt. 1988, Magacaabid Nootaayo.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.62 kuna saabsan hawsha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Qod. 2aad ee Sharciga lr. 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah iyo tartan la'aan u magacaabo Notaayo qofkii mudan;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. Cabdiraxmaan Cabdille Dirir (Dhoobeey) waxaa loo magacaabay Notaayo, wuxuuna hawshiisa Nootaayonimo ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 3 Oct. 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA SOOL LAASCANOOD

ISAGOO ARKAY: Arjiga Dacwadda ee Maxkamadda kee nay C/kariin Aw Xasan Muuse Deggan Laascaanood.
ISAGOO ARKAY: Baafinta Bankiga Ganacsiga iyo keyd ka Soomaaliyeed Laanta L/Caanood ee 1.10.88.
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1965, qodobka 69aad,

ISAGOO ARKAY: Xaqiijiyay inuu maqanyahay J/War. Lr. 0708159, ee 3.2.88 Jeegaas oo ku lumay Burco 17.9.88, kana lumay Dacwadaha Sare kuxusan wuxuu ka soo baxay L/4aad Xamar waxaana ku qoran sh.so. 50.000 magaca Aadan Cabdi Yuusuf.

WUXUU XEERIYEY

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas C/kariin Aw Xasan Muuse ka dib markay ka soo wareegto 30 Casho markuu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Haddii la helin wax is hortaag ah.

CIDDA LOO DHIIBI KARO

Marka la cusboonaysiiyo Jeegaas waxaa lacagta ku qoran oo dhan sh.so. 50.000 lagu wareejinyayaa C/kariin Aw Xa san Muuse ama qof ka haysta wakaalad sharci ah isaga.

L, MGS/24/88 Tr. 3.10.1988.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/SOOL L/CAANOOD
Maxamed Sh. Cabdi Maxamed.

KAALIYAHA MAXKAMADDA
Maxamed Cumar Xaaji Cali.

L. 506

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Sugiwaa Cali Fiidow;

HADDU UTIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. da lam. 12997 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed Laanta 3aad Xamar;
lam. 193218-068491 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 18.000 iyo 4.700 guud ahaan Sh.So. 22.700 ku qoran magaca J.le Sugiwaa Cali Fiidow sida ku cad warqad-
HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 193218-068491 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 22.700 ku qoran magaca J.le Sugiwaa Cali Fiidow.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar in ay siiso J.le Suwigaa Cali Fiidow lacagta ca-dadeedu tahay Sh.So. 22.700 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka ya-reyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daa-baco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.
Muqdisho, 31.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 507

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le C/laahi Jaamac Cilmi.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lr. 1291615 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed L/2aad Xamar kuna jirto lacag dhan sh.so 100.000 ku qoran J/le C/laahi Jaamac Cilmi sida ku cad warqadda Lr. 12731 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 1291615 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/2ad Xam. kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 ku qoran magaca J/le Cabdullaahi Jaamac Cilmi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/2aad Xamar in ay siiso J/le C/laahi Jaamac Cilmi lacagta cadad eedu tahay sh.so. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qo ran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maal mood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 15.11.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 508

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdi Khaliif Maxamed Jaamac.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay B/Keyd Lr. 29879 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L/Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 9.000 ku qoran magaca J/le Cabdi Khaliif Maxamed Jaamac sida ku cad warqadda Lr. 3398 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Keyd Lr. 29879. ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L/Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 9.000 ku qoran magaca J/le Cabdi Khaliif Maxamed Jaamac.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta in ay siiso J/le Cabdi Khaliif Maxamed Jaamac lacagta ca daqeedu tahay sh.so. 9.000 oo ah beddelkii B/Keydkii kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 20.11.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 509

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Caydaruus Guure Faarax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lr. 0764940 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 30.000 ku qoran magaca J/le Caydaruus Guure Faarax sida ku cad warqadda Lr. 13781 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0764940 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 30.000 ku qoran magaca J/le Caydaruus Guure Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta in ay siiso J/le Caydaruus Guure Faarax lacagta cadedeedu tahay sh.so. 30.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran, ma rkay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras miga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 20.11.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 510

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Fowsiya Maxamed Xasan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay B/Keyd Lr. 26927 oo laga sameeyay L/Xarunta ee Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan sh.so. 2.542.72/= kuna qoran magaca Fowsiya Maxamed Xasan sida ku cad warqadda Lr. 1978 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta Tr. 17.9.88.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Keyd Lr. 26927 oo ka soo baxay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta kuna qoran magaca Fowsiya Maxamed Xasan kuna jirto lacag dhan sh.so. 2.542.72/=

WAXAA LA AMRAYAA

L/Xarunta ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Fawsiya Maxamed Xasan lacagta cadadkeedu yahay sh.so. 2.542.72/= oo ah bedalkii J/War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30. maalmood laga bilaabo maalinta goaanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.9.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 511

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faarax Maxamed Warsame;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 18 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laaamo kala duwan kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.796.500 kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 13722 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha hoos ku qoran;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0115460 | 220.000 | Maxamuud Sh. Isxaaq Xasan | B/Xaawo |
| 0115458 | 185.000 | » » » » | » |
| 0115461 | 150.000 | Xasan Dhaqane Cali | » |
| 1099027 | 100.000 | Axmed Maxamed Macalin | 1/Xamar |
| 1121335 | 100.000 | » » » | » |
| 1099032 | 100.000 | » » » | » |
| 1114257 | 100.000 | » » » | Xarunta |
| 1099029 | 100.000 | » » » | » |
| 1114261 | 100.000 | » » » | » |
| 1114263 | 100.000 | » » » | » |
| 1081046 | 100.000 | Cabdullaahi Cumar Saalax | Kismaayo |
| 1081047 | 100.000 | » » » | » |
| 0953125 | 100.000 | Xakiimo Cumar Bare | Dh/mareeb |
| 1173783 | 100.000 | Maxamuud Gaas Bare | W/dhiigley |
| 0689404 | 50.000 | Axmed Maxamed Macalin | 1/Xamar |
| 0689515 | 50.000 | Ibraahim Muuse Ibraahim | Xarunta |
| 0308930 | 24.000 | Cabdisalaam Muumin Cumar | Kismayo |
| 0056975 | 17.500 | Siraad Nuur Axmed | 5aad |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.796.500 kuna kala qoran magaca mid walba hor qoran.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran in ay siiyaan Jaalle Faarax Maxamed Warsame lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.796.500/= oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 512

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Xaamud Axmed Alaale.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lr. 594161 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Boorama kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 ku qoran magaca J/le Mustafa Maxamed Shariif sida ku cad warqadda Lr. 13481 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Boorama.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 594161 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Boorama kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 ku qoran magaca J/le Mustafa Maxamed Shariif.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Boorama in ay siiso J/le Xaamud Axmed Alaale lacagta cadadkeedu yahay sh.so. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras miga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 10.11.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 513

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Daahir Cusmaan Cosoble;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 1291812-1291813 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 ku qoran magaca J.le Daahir Cusmaan Cosoble sida ku cad warqadda lam. 13677 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 1291812-1291813 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 200.000 ku qoran magaca J.le Daahir Cusmaan Cosoble.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad ee Xamar in ay siiso J.le Daahir Cusmaan Cosoble lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 514

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Casay Weydow Xayow;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lr. 0698500-716109 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna kala jirto lacag kala ah Sh.So. 50.000 iyo Sh.So. 17.000 guud ahaan Sh.So. 67.000 ku qoran magaca J.le Casay Waydow Xayow sida ku cad warqadda lam. 13855 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley; .

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9 1966.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0698500-716109 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So 67.000 ku qoran magaca Caday Weydow Xayow.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Caday Waydow Xayow lacagta qaddeedu tahay Sh'So. 67.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 21.11 1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L 515

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaamud Maxamed Xuseen;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0117200 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo- maaliyeed Laanta B/Xaawo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 368.000 ku qoran magaca J.le Xasan Khaalid Maxamuud si- da ku cad warqadda lam. 3804 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0117200 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 368.000 ku qoran ma gaca J.le Xasan Khaalid Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo in ay siiso J.le Xaamud Maxamed Xuseen lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 368.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 516

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Nuur Cusmaan Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lr. 1034312_1034313 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 ku qoran magaca J.le Nuur Cusmaan Aadan sida ku cad warqadda lam. 13849 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 1034312_1034313 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000 ku qoran magaca J.le Nuur Cusmaan Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera in ay siiso J.le Nuur Cusmaan Aadan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor k uqoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 517

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga Wareega oo Lam. 0254526 — ilaa 0254565, lagana saameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000.000/= oo Jeegiiba yahay 500.000 Sh.So. kuna qoran magaca J.le Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow, sida ku cad warqadda lam. 13962 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad ee Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega 0254526 ilaa 0254565, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed Laanta 2aad Xamar, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000.000, kuna qoran magaca J.le Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow, lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 20.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa wax is hortaag ah aan ka imaanin.

Muqdisho, 24.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 518

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 1338734 — ilaa 1338737 laga sameeyey Bangiga Ganac siga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca J.le Xaa ji Cusmaan Xasan Gaaboow, sida ku cad warqadda lam. 14060 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laan ta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1338734 — ilaa 1338737 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar ku jirto lacag dhan Sh. So. 400.000 ku qoran magaca J.le Xaaji Cusmaan Xasan Gaa boow.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar, in ay siiso J.le Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow, lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 400.000 oo ah bedelkii Jee_ gagga Wareega kor ku xusan, markay ka soo wareegto mud_ do aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'_ aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii in_ ta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 519

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga Wareega Lam. 1338739 — ilaa 1338741 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar ku jirtay lacag dhan Sh.So. 300.000 ku qoran magaca Xaaji Cus maan Xasan Gaaboow, sida ku cad warqadda lam. 14060, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega Lam. 1338739 — ilaa 1338741 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Xaaji Cusmaan Xasan Gaaboow lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L 520

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Sheegow Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lr. 11632 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 2408.24 kuna qoran magaca J.le Maxamed Sheegow Maxamed sida ku cad warqadda lam. 1847 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 11632 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 2408.24 kuna qoran magaca J.le Maxamed Sheegow Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Maxamed Sheegow Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 2408.24 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 521

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xuseen Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 7008 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 139.333.33 ku qoran magaca J.le Maxamed Xuseen Maxamed sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1963.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 7008 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 139.333.33 ku qoran magaca J.le Maxamed Xuseen Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir in ay siiso J.le Maxamed Xuseen Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 139.333.33 oo ah bedelkii Buug Kayd ka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 522

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maryan Maxamed Aadan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lr. 0776798 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed L/2aad Xamar, kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 ku qoran magaca J/le Maryan Maxamed Aadan sida ku cad warqadda Lr. 14158 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0776798 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 ku qoran magaca J.le Maryan Maxamed Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Maryan Maxamed Aadan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 523

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. MUDUG KA DIB:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Salaad Yuusuf uuna ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega oo hoos ku taxan oo ka lumay;

MARKUU ARKAY: Warqadda taariikhdeedu tahay 20.11.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, laguna caddeeyey in Jeegaggaasi sharci ahaan ugu wareegeen gacanta Maxamed Salaad Yuusuf ayna ka lumeen baafin guudna laga sameeyey;

MARKUU ARKAY: Qodobka 69aad ee Xeer-Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii;

WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo Jeegagga Wareega oo hoos ku taxan oo lumay kalana ah:-

1) Jeeg Wareega Lr. 1298915 Tr. 6.10.1988 Shs. 100.000 ku qoran Ismaaciil Sh. Sulub,

2) Jeeg Wareega Lr. 1298914 Tr. 6.10.1988 Shs. 100.000 ku qoran Ismaaciil Sh. Sulub, iyo

3) Jeeg Wareega Lr. 1299010 Tr. 6.10.1988 Shs. 100.000 ku qoran Cali Warsame Jaamac.

WUXUU AMRAYAA OO KALE

In Jaallahaas loogu beddelo Jeegag cusub oo u dhigma ka dib markii Amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah, waana in Jeegagga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaraa Jaalle Maxamed Salaad Yuusuf amase cid wakaalad sharci ah ka haysata.

Gaalkacyo 23.11.1988

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

L. 524

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalie Saciido Faarax Bootaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lr. 0254721-1339072 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kayd ka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 iyo Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 600.000 ku qoran magaca J.le Cali Maxamed Cismaan sida ku cad warqadda lam. 14366 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayd ka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammirtamenti) Jeegagga War. Lam'

0254721-1339072 ee Bangiga Ganacsiga iyi Kaydka Soomaa-liyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirti lacag dhan guud ahaan Sh.Si. 600.000 ku qiran magaca J.le Cali Maxamed Cismaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyi Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siisi J.le Saciido Faarax Bootaan lacag ca-dadeedu tahay Sh.So. 600.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka ya-rayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daa baco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 525